

Xeerarka Shaqada ama Hawsha: Waxaad u baahan tahay in aad ogaato haddii aad hesho SNAP iyo OHP labadoodaba



Haddii aad faa'iidooyinka hesho adiga oo adeegsanaya Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP) iyo Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) labadoodaba, waxaad u baahan kartaa in aad raacdo xeerarka shaqada ama hawsha oo gooni ah si aad u sii haysato faa'iidooyinkaaga. Xeerarka shaqada ama hawsha ee OHP waxay bilaabmayaan Janaayo 2027.

Labo qaybood oo sharciyo ah

SNAP iyo OHP labadooduba waxay leeyihiin xeerarka shaqada ama hawsha. Xeerarku ma aha kuwo isku mid ah. Barnaamij kastaa wuxuu leeyahay mid u gaar ah:



Xeerarka shaqada ama hawsha



Waxyaabaha la iska dhaafayo




Waqtiyada loo qabtay dib u cusbooneysiinta

Sidee baan u ogaanayaa xeerarka i khuseeya?

Marka la joogo wakhtigii dib loo cusbooneysiin lahaa, waxaad warqado kala gooni ah ka heli doontaa OHP iyo SNAP. Warqadahaagu waxay kuu sheegi doonaan:

- Haddii ay tahay in aad buuxiso xeerarka shaqada ama hawsha.
- Waxa aad u baahan tahay in aad sameyso ee xiga.



Waxyaabaha la iska dhaafayo

Waxaa dhici karta in aadan u baahnayn in aad buuxiso xeerarka shaqada ama hawsha

Dadka qaarkiis uma baahna in ay buuxiyaan xeerarka shaqada ama hawsha. Tani waxaa loo yaqaan wax iska dhaafitaan. SNAP iyo OHP labadooduba waxay leeyihiin waxyaabo la iska dhaafayo. Halkan waxaa ku qoran tusaalooyinka qaarkood ee waxyaabaha la iska dhaafayo ee khuseeya labada barnaamijba:

- Waxaad daryeeshaa ilme ama qof naafo ah.
- Waxaad leedahay xaaladdo caafimaad oo gaar ah.
- Waxaad ku jirtaa daaweynta khamriga ama daroogada.
- Waxaad tahay qof uur leh.
- Waxyaabo badan oo la iska dhaafayo ayaa laga heli karaa dhanka internet-ka.



SNAP iyo OHP waxay leeyihiin waxyaabo la iska dhaafayo oo kala duwan. Waxaa dhici karta in aad u qalanto wax la iska dhaafayo oo ku jira hal barnaamij balse aadan u qalmin kan kale.

Liiska buuxa ee waxyaabaha la iska dhaafayo, booqo <https://OHP.Oregon.gov/HR1>.

Haddii AAN wax lagaa dhaafin

Labada barnaamijba waxay u baahan yihiin xaddiga ugu yar ee shaqo ama hawlo wax loogu qalmo, taasi oo ay ku jiraan:

- Shaqo lacag la qaadanayo
- In la tabaruco
- Bixinta daryeel ama shaqo kale oo aan lacag la qaadanayn
- Shaqo la dhaafsado guryo ama baahiyo kale
- Is-qorista dugsiga ama barnaamij tababar
- Ardayda waxaa dhici karta in laga dhaafo xeerarka shaqada ee SNAP. Wixii la xiriira OHP, is-qorista dugsigu waxay buuxin kartaa xeerarka hawsha.
- Isku dar kasta oo ka mid ah hawlahaan.



Waxaan kaa caawin karnaa in aad ogaato haddii aad buuxinayso xeerarkani iyo waxa ay tahay caddeynta aad u baahan tahay in aad keento, sida saacadaha, taariikhaha, iyo foomam la saxiixay.

Waxa la sameynayo hadda

- ✓ Ka dhig macluumaadkaaga mid cusub
 - Noo sheeg isbeddelada cinwaankaaga, email-kaaga, lambarkaaga telefoonka si aadan u waayin macluumaad muhiim ah.
- ✓ Soo sheeg waxyaabaha la iska dhaafayo, shaqada ama hawlaha loo qalmo, ama isbeddelada ku yimaada labada barnaamijba: Isticmaal koontadaada Dhanka internet-ka ee ONE ama Oregon ONE Mobile oo laga helo <https://benefits.oregon.gov>, Adeega Macmiilka ee ONE ka wac 800-699-9075, ama booqo xafiiska degaanka oo laga helo <https://ODHSoffices.oregon.gov>.
- ✓ Akhri dhammaan boostada ka socota SNAP iyo OHP
- ✓ Buuxi dhammaan wakhtiyada kama dambeysta ah ee la qabtay
- ✓ Soo sheeg isbeddelada saameynta ku yeelan kara waxyaabaha lagaa dhaafayo
- ✓ Su'aalo weydii wakhti kasta



Nala soo xiriir

- | | | |
|-------------------------------|--|--|
| Waad la xiriiri kartaa si aad | <ul style="list-style-type: none">• U fahamnto xeerarka shaqada ama hawsha ee SNAP iyo OHP• U soo sheegto shaqadaada ama hawlahaaga | <ul style="list-style-type: none">• U soo sheegto waxyaabaha la iska dhaafayo• U hesho caawimaada buuxinta xeerarka |
|-------------------------------|--|--|



Booqo <https://benefits.oregon.gov>



Wac 800-699-9075 (Wicitaanada gudbinta waa la soo dhaweynayaa)



Kaaliyaha OHP oo wax caawin kara ka hel <https://oregonhealthcare.gov/gethelp>



Booqo xafiiska Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon. Xafiiska degaanka ka hel

<https://ODHSoffices.oregon.gov>



Iskaan garee code-ka QR si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato xeerarka shaqada ee SNAP

<https://Oregon.gov/snapworkrules>



Iskaan garee code-ka QR si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato isbeddelada federaalka

<https://OHP.Oregon.gov/HR1>

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo lacag la'aan ah oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille, ama qaab aad u baahan tahay. Email noogu soo dir one.communications@odhsoha.oregon.gov ama wac 800-699-9075. Waan soo dhaweynaynaa wicitaanada gudbinta oo dhan.

